

# Tayada Nolosha: Farsamo loogu talagalay Daryeel bixiyaasha

## Marka ay taageerayaan dad aan mar kasta sheegi karin baahiyahooda

Su'aashaan waa farsamo ikhiyaari ah oo loogu talagalay kooxaha taageerada si ay uga fikiraan waxyaabaha kor u qaadi kara tayada nolosha qofka. Waxaa loo sameeyay inuu ka jawaabo daryeele, si fiican u yaqaana qofka, marka qofka la taageeraayo uu dhib ku qabo ka jawaabida su'aalaha uuna mar kasta u sheegi karin daryeeleyaasha waxa uu doonaayo ama u baahan yahay.

Dadka ka jawaabi kara su'aalaha ku saabsan noloshooda marka la siiyo caawimaad ama aan la siin waa inay adeegsadaan *Tayada Nolosha: Farsamo aad ugu sheegayso dadka kale sida aad dareemayso*.

Inkastoo ay jiraan farsamooyin badan oo ka caawinaaya kor u qaadista tayada nolosha qofka, farsamadaan ayaa si gaar ah diirada u saaraysa waxyaabaha daryeel bixiyaashu ay samayn karaan ama ay ka fiirin karaan habdhaqanka qofka, badelkii ay qiyaasaad mala awaal ah ka samayn lahaayeen dareenka ama fikirka qofka.

### Tilmaamaha

1. God kasta oo ku jira bogaga soo socda, dooro heerka aad waafaqsan tahay jumlada.
2. Kadib marka aad buuxiso foomka, akhri talaabooyin dabagalka ah ee ku qoran dhammaadka dukumiintigaan oo ku calaamadaysan: [Adeegsiga farsamadaan si loogu sameeyo isbadello wanaagsan nolosha qofka](#).
3. Samayso qorshe oo talaabooyin qaad si aad qofka uga caawiso kor u qaadista tayadiisa nolosha. Qofku waa inuu sheego talaabooyinka xiga ilaa heerka ugu badan ee uu awodo.

### Tusaale

*Istaraatijiyyada taageerada oo hagaajinaya nolosha qofka:* Qofka ayaa helaaya taageero marka uu u baahdo asagoo adeegsanaaya tignooloojiyada kaalmada.

*Jawaabaha macquulka ah:*

**Si xooggan u diidan:** Haddii daryeel bixiyaashu aysan iskudayin inay qofka ka taageeraan nooc kasta oo tignooloojiyada kaalmaatiga ah.

**Diidan:** Haddii tignooloojiyada Kaalmaatiga ah horey la iskugu dayay laakiin aan hadda la isticmaalin.

**Ma aqaano ama ima qusayso:** Tusaalahaan, "ma aqaano ama ima qusayso" waa inaan la dooran waayo taageerada tignooloojiyada Kaalmaatiga ah waa in loo xulaa loona adeegsadaa dhammaan dadka dhibka ku qaba inay hadlaan.

**Ogol:** Haddii qofku uu haysto aalada hadalka uuna mararka qaar adeegsado, laakiin uusan mar kasta adeegsan, ama haddii hanaanka barista ama barashada aaladu wali socdo. Xasuusnoow inay tahay wax badanaa dhacda oo gebi ahaanba caadi ah inay ku qaadato sanado badan in qofku si buuxda u barto adeegsiga aalada hadalka.

**Si xoogan u ogol:** Haddii qofku uu haysto aalada hadalka oo waxtar leh uuna si joogto ah ugu adeegsado si uu qaab joogto ah oo fudud ugula hadlo daryeel bixiyaasha. Haddii "Si xoogan u ogol" la doortay, waxaa haboonaan lahayd in la adeegsado foomka la socda farsamadaa, oo ciwaankiisu yahay: Nolosheyda Ugu Wanaagsan: farsamo aad ku sheegayso sida aad dareemayso.

*Talaabooyinka macquulka ah ee caawin kara qofka:* Maareeyaha kiiska ayaa adeeg cusub ku dari kara qorshaha qofka, taqasusle ayaana ka caawin kara qofka aqoonsiga aalada hadalka oo waxtar leh iyo barista qofka sida loo adeegsado aalada.

## Bilaabida

Magaca qofka: \_\_\_\_\_

Taariikhdi ugu danbaysay ee foomkaan la buuxshay ama markii ugu danbaysay ee dib loo eegay: \_\_\_\_\_

Qofka kaa caawiyay buuxinta foomkaan: \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_

## Cabirada iyo istaraatijiyyadaha taageerada ee ay daryeel bixiyaashu tixgelinayaan

Qaybaha hoos ku qoran ayaa loogu talagalay inay ka hadlaan mawduucyo kaladuwan oo balaaran oo la xiriira tayada nolosha, mana ahan in qayb kasta ay qusayso dadka oo dhan. Isbadello waad ku samayn kartaa farsamadaan haddii loo baahdo.

Xiriirada	Si xoogan ayaan u diidanahay	Kasoo Horjeeda	Ma aqaano ama ima qusayso	Ku Raacsan	Si xoogganu ogol
Qofku wuxuu xiriiro qoto dheer la leeyahay dadka kale ee aan ahayn daryeel bixiyaasha mushaarka qaata					
Qofka waxaa la siiyaa fursdo joogto ah oo uu ugu dabaaldego uuna kula xiriiro dadka ay wadaan dhaqanka, fikradaha shaqsiga ah ama aqoosiga					
Haddii uu doonaayo qofku, dhalashadiisa ayaa la aqoonsadaa ayna u dabaal degaan sanad kasta dadka daryeela					
Ugu yaraan labo jeer sanadkii, qofka iyo kooxdiiisa taageerada ayaa kulma si ay u aqoonsadaan mabaadii'da uu qofku bud-dhiga u yahay oo muhiim u ah qofka.					
Haddii loo baahdo, qofka ayaa leh qorshe (lagu dhafi karo dukumiintiyada kale) si loo kordhiyo isdhexgallada bulshada ee wanaagsan oo la xiriira mabaadii'da qofka muhiimka u ah, dhammaan shaqaalahana waa loo tababaray qorshaha					
Shaqaalahana ayaa dhiiri geliyo oo ku abaal mariya isdhexgallada wanaagsan ee bulshada maalin kasta					
Shaqaalahana ayaa tababar rasmi ah ku qaatay heerarka iyo xirfadaha fahanka iyo ku hadalka luuqada ee qofka					
Qofka ayaa haysta qaab uu ku sheego waxa uu doonaayo iyo baahiyihiisa (oo aysan ku jirin habdhaqanno carqalad ah), kuwaasoo shaqaaluhu inta badan fahamaan <b>ama</b> waxaa jira qorshe qoran oo qofka looga caawinaayo barashada xirfadahaas					
Qofka ayaa hela taageero marka uu u baahdo asagoo ku hela tignooloojiyyada caawimaada, turjumaano, fasireyaal ama taageerooyin kale					

Go'aanka iyo dookha madaxa banaan	Si xoogan ayaan u diidanhay	Kasoo Horjeeda	Ma aqaano ama ima qusayso	Ku Raacsan	Aad ayaan u waafaqs anahay
Qofka ayaa maamula dhaqaaliiisa ama, haddii uu u baahan yahay caawimaad, qofka ayaa xukuma waxa lagu bixinaayo lacagtiisa (baashaalka)					
Maalin kasta, qofka ayaa awooda inuu booqdo dadka ka baxsan shaqaalaha (tan waxaa ku jiri kara booqasho toos ah, mid taleefanka ah, wada sheekaysiyada muuqaalka ah, iwm.) (kuma jiraan amarada maxkamada ama xadidaadaha habaynkii ee loo sameeyo sababo amaan awgood)					
Nashaadaadka la siiyo qofka waxay waafaqsan yihiin dhaqankiisa ama dookhyadiisa kale ee shaqsiga ah					
Qofka ayaa haysta alaab shaqsi ah oo waafaqsan dhaqankiisa ama xiisihiisa (sida muusiga, ciyaarah, agabka farshaxanka, iwm.)					
Goobta uu qofku dagan yahay ayaa loo goglay loona sharxay qaabka uu qofku doonaayo waxaana yaala waxyaboo farxad leh, oo xiiso u leh in qofku daawado uuna ku baashaalo					
Qofku wuxuu leeyahay dhar muujinaaya qaabkiisa gaarka ah iyo aqoonsigiisa jinsiga					
Qofku wuxuu awoodaa inuu doorto meesha uu ku nool yahay, <b>ama</b> waxaa la siiyay adeegyada taageerada dheeriga ah si uu ugu guuro meel cusub					
Qofku wuxuu awoodaa inuu doorto cida uu la noolaanaayo ama haddii uu keligiis noolaanaayo, <b>ama</b> waxaa i siiyay adeegyada taageerada dheeriga ah si uu ugu guuro meel cusub					
Ugu yaraan halmar sanadkii, qofka waxaa la siiyaa fursado uu <a href="#"><u>dookh faahfaahsan ku gaaro</u></a> oo la xiriira sadeegyada shaqada si uu u xusho fursadaha kaladuwaa ee shaqada ama mutadawacnimada ee uu dooni karo, ayna ku jiraan fursado si uu u badelo shaqooyinka ama shaqooyinka mutadawacnimada ah					
Qofku wuxuu go'aansadaa sida uu u adeegsanaayo maalintiisa (filashooyinka waxaa ku jiri kara cimilo xun, daryeel caafimaad, dugsi, iwm.)					
Qofku wuxuu haystaa dookhyo badan maalin kasta si uu ku go'aansado marka uu waxyaboo samaynaayo (tani kama dhigna in nashaadaadka la baxsho maalin kasta laakiin qofka waa in la siiyaa dookhyada qaar)					
Waxaa jira shaqaale ku filan oo taageeraaya baahiyaha iyo dookhyada qofka.					
Qofka ayaa awooda inuu dookhyo iskiis ah ka gaaro cuntooyinka uu cunaayo iyo sida uu u cunaayo (kuma jiraan xadidaadaha xuquuqda ee xaaladaha caafimaad ee khatarta ku ah nolosha)					
Qofka ayaa fursado joogto ah u helaaya ku dhaqanka diinta uu doono, waxaa la siiyay fursado uu ku kala xusho diimaha (hadduu doonaayo), ama wuxuu xaq u leeyahay inuusan wax diin ah ku dhaqmin					

Hormarinta qofka	Si xoogan ayaan u diidanahay	Kasoo Horjeeda	Ma aqaano ama ima qusayso	Ku Raacsan	Aad ayaan u waafaqs anahay
Qofku wuxuu haystaa qorshe asaga gaar ah u ah, qimaynta dookha ama dukumiinti kale oo sheegaaya nashaadaadka bulshada ama kuwa kale ee qofku xiiseynaayo					
Maalin kasta, qofka ayaa la siiyaa nashaadaadka bulshada ama kuwo kale oo uu jecel yahay					
Qofku wuxuu caadiyan doortaa inuu ka qaybgalo nashaadaadka la siyo					
Qofku wuxuu haystaa higsiyada waxbarashada oo ku qoran qorsheyaashiisa, oo uu doortay qofku, kuwaasoo ay ku jiraan sida shaqaaluhu u siinayaan xogta iyo taageerada Higsiyada waxbarashada ayaa lagu gaari karaa wax kayar sanad (inkastoo ay noqon karaa talaabo kamid ah higsiga muddada fog)					
Qofku wuxuu caadiyan doortaa inuu ka qaybgalo higsiyada waxbarashada					
Waxaa jira qorshe qoran (kaasoo lagu dari karo dukumiintiyo kale) si ay gacan uga gaystaan madax banaanida qofka					
Waxaa jira qorshe/hanaan lagu xaqijinaayo in higsiyada iyo qorsheyaasha loo dhaqan gasho sida ay u qoran yihiin, si joogto ahna ay u raacaan shaqaaluhu					

Xaqquqaha	Si xoogan ayaan u diidanahay	Kasoo Horjeeda	Ma aqaano ama ima qusayso	Ku Raacsan	Aad ayaan u waafaqs anahay
Xuquuqda qofka ayaa loogu sharxay qofka qaab uu fahmaayo, <b>ama</b> haddii qofka ay ku adag tahay inuu fahmo, qofka ayaa leh wakil taageeri kara					
Ugu yaraan labo jeer sanadkii, qofka ayaa la xasuusiyaa fursadaha uu kula xiriiri karo wakiillada ama ururada u doodaaya danihiisa					
Qofka ayaa si joogto ah loogu sheegaa fursadaha uu uga qaybgeli karo nashaadaadka bulshada (tusaaleyaasha waxaa ku jiri kara codbixinta, ka qaybgalka kulannada golaha deegaanka ee magaallada, ku biirista banaanbaxyada, helitanka funaanadaha ama boorarka muujinaaya taageerada bulshooyinka uu qofku taageero, iwm.)					
Haddii qofku xiiseynaayo ka qaybgalka nashaado kasta oo bulsho ama u qareemid ah, daryeel bixiyaasha ayaa si joogto ah u taageeraaya isku xirkha (tusaale: u qaadista qofka kulannada, ka caawinta qofka wicista qareen, iwm.)					

Ka qaybgalka bulshada	Si xoogan ayaan u diidanhay	Kasoo Horjeeda	Ma aqaano ama ima qusayso	Ku Raacsan	Aad ayaan u waafaqs anahay
Dhawr jeer asbuuc kasta, qofka ayaa la siiyaa fursado uu ku booqdo xarumaha kaladuwaa ee bulshada ee uu jeelaan lahaa marka lagasoo tago gurigiisa, dugsiga ama goobta shaqada.					
Dhawr jeer asbuuc kasta, qofka ayaa la siiyaa fursado uu uu sameeyo nashaadaadka bulshada oo uu la sameeyo dadka aan ahayn kuwa qolka la seexda, shaqaalaha la shaqeeya ama shaqaalaha mushaarku ku qaata					
Qofku wuu diidi karaa nashaadaadka bulshada ama deegaanka xili kasta kooxda ayaana qadarinaysa dookha qofka (kuma jiraan xadidaadaha xuquuqda ama amarada sharciga si loo hubio faya qabka qofka)					
Haddii hoos u dhac ku yimid la falgelida qofka ee bulshada, talaabooyin ayaa la qaaday si loo go'aansho loona xaliyo waxa keenay, sida isbadello ku yimaada xiiseyaasha, luminta saaxiibada, baaritaannada caafimaadka ama dhimirka (tusaale: niyad jabka, luminta xasuusta, xanuun, iwm.), iwm.					
Ugu yaraan labo jeer sanadkii, qofka ayaa loo sheegaa fursadaha uu ugu biiri karo ururada bulshada sida xarumaha dalxiiska ama jiimka, naadiyada, maktabadaha, xulalka kubada la dilin-dileeyo, kooxaha mutadawiciinta ah, iwm.					
Qofka ayaa haysta fursadaha, taageerada iyo khayraadka muhiimka ah si uu uga qaybgaloo baraha bulshada, haddii uu doonaayo qofku.					

Lacagta iyo alaabta shaqsiga ah	Si xoogan ayaan u diidanhay	Kasoo Horjeeda	Ma aqaano ama ima qusayso	Ku Raacsan	Aad ayaan u waafaqs anahay
Qodku wuxuu haystaa dakhli ku filan ama khayraad kale oo dhaqaale si uu u helo waxyaabaha uu u baahan yahay iyo waxyaabaha qaar ee uu doonaayo, <b>ama</b> wuxuu leeyahay qorshe qoran si uu uga caawiyo inuu helo xasilooni dhaqaale					
Qofku wuxuu leeyahay uuna heli karaa si aan xadidnayn agabkiisa shaqsiga ah ee muhiimka u ah (tusaale: taleefanka gacanta, kaarka baska, baaskii, ciyaaraha muuqaalka, kumbuyuutar, iwm.) (kuma jiraan amarada sharciga ah ama xadidaadaha xuquuqda ee la xiriira badqabka)					
Alaabta qofka way qadariyaan shaqaalaha mushaarka qaata, dadka qolka la dagan iyo dadka soo booqda					
Qofku wuxuu haystaa dookhyada badan ee dharka si uu u kala xusho maalin kasta kuwaasoo ku haboon cimilada jirta, si fiican u le'eg, aana lahayn duleelo ama jeexjeex (in qofku sidaas doorto maahee)					

<b>Caafimaadka jirka iyo dhimirka</b>	<b>Si xoogan ayaan u diidanahay</b>	<b>Kasoo Horjeeda</b>	<b>Ma aqaano ama ima qusayso</b>	<b>Ku Raacsan</b>	<b>Aad ayaan u waafaqs anahay</b>
Qofka waxaa la siiyay fursado uu kula kulmo taqasusleyaal si ay uga caawiyaan dhibaatooyinka caafimaad ee uu qabo (tusaale: dhakhtarka xanuunka, dhakhtarka kala goysyada, dhakhtarka dhimirka, iwm.)					
Waxaa jira qorshe qoran si loo joogteeyo ama loo hormariyo caafimaadka jireed ee qofka					
Waxaa jira qorshe qoran si loo joogteeyo ama loo hormariyo caafimaadka dhimirka ee qofka					
Qofku wuxuu leeyahay aag banaan oo ku filan oo ku yaala gurigiisa, fagaaga ama shaqada si uu ugu taageero caafimaadka jirka iyo dhimirka					
Qofka waxaa la siiyaa qaabab kaladuwan oo hal abuur leh oo uu ku ilaaliyo caafimaadkiisa jireed kuwaasoo ka balaaran cunista saladhka iyo jimicsiga jirka (tusaale: tagista beerta raaxada ee quruxda badan soo wareegida ama ku dheelida qaar kamid ah muusiga asagoo samaynaaya casho)					
Qofku wuxuu heli karaa daryeel caafimaad oo ku haboon dhaqanka, sida ay soo jeediyaan xirfadleyaasha caafimaadka ee ruqsada leh					
Turjumaannada ayaa la siiyaa marka uu ugu baahdo balamaha caafimaadka					
Guriga qofku waa mid nadiif ah, aan qashin lahayn, waxyaabaha yaalana waa kuwo la dayactiro (tusaale roogaga, mutuleelka, kobadiinnada, armaajoooyinka, iwm.)					
Qofka la siiyay xog, qaab uu fahmaayo, taasoo ku saabsan sida uu naftiisa iyo dadka kaleba uga difaacaayo cudurada caabuqa					
Dadka taageera qofka ayaa yaqaana sida loo aqoonsado loogana jawaabo calaamadaha walaaca					
Haddii uu qofku doonaayo, dhacdooyin kasta oo xun oo xasuus ku reebay ayaa lagu qoraa qorsheyaasha qofka ayadoo la raacsho tilmaamo ku aadan sida dadka kale u taageeri karaan qofka					
Dadka taageera qofka ayaa loo tababaray inay aqoonsadaan ayna ka jawaabaan calaamadaha dhacdada xasuusta xun ayna fahmaan in xasuusta xun ay saamayn karto habdhaqanka, khibradaha, caafimaadka qofka, iwm.					

## Adeegsiga farsamadaan si loogu sameeyo isbadello wanaagsan nolosha qofka

Hadda oo farsamadaan la dhameeyay, akhriya xogta oo ka dooda koox ahaan waxa la samayn karo si loo badelo ama loo hormariyo taageerooyinka qofka si loo hagaajiyo tayada noloshiisa. Haddii kooxda taageeradu aysan hubin waxa ay samayn karaan, waxay:

- Talo ka qaadan karaan [fududeeyaha qorshaynta gaarka ah ee qofka](#) (marka aad webseedka gasho, hoos ugu deg qaybta "Planning facilitators (Fududeeyaasha qorsheynta)" kadibna guji "Regional listing of available person-centered planning facilitators (Liiska fududeeyaasha qorshaynta gaarka ah ee qofka ee gobalka)" si aad u hesho fududeeye kuu dhow)
- Waxay la shaqayn karaa urur kale ama koox kale oo heer gobal kuwaasoo ay adeeg bixiyaasha kale ama maareeyaasha kiisku ku biirin karaan fikrado
- Waxay tixgelin karaan haddii shaqaale dheeri ah loo baahan yahay si loo dhaqan gasho fikrado kasta, waxayna u diri karaan codsi maamulaha kiiska si loo kordhiyo shaqaalaha marka loo baahdo
- Haddii isbadellada joogtada ah ee shaqaaluhu ay si xun u saameynayaan nolosha qofka, booqo [Bogga Shaqaale Yarida ee DHS](#) si aad uga hesho firkado iyo khayraad kaa caawinaaya helitaanka iyo joogtaynta shaqaalaha
- Kala xiriir DHS si aad u hesho caawimaad farsamo ciwaanka [PositiveSupports@state.mn.us](mailto:PositiveSupports@state.mn.us).

Farsamadaan ayay u badan tahay in loo baahdo in lala socdo muddo dhawr bilood ah ama sanado ah si loo xaiijiyo in qofka iyo kooxdiius ay sii wadaan qiimaynta iyo hormarinta tayada nolosha. Hal qaab oo lagula socdo dedaallada ayaa noqon karta aqoonsiga talaabooyinka/higsiyada talaabada iyo in la iskugu geeo adeegyada isku dubaridan ee qofka iyo qorshaha taageerooyinka (CSSP).